

Somali

Siyaasadda Booqdeyaasha Isbitaalka MaineHealth – Dhaqan gelayso laga bilaabo Luulyo 20, 2020

BOOQDEYAASHA / WEHLIYAYAASHA looma oggola xerooyinka isbitaalka, marka laga reebo kuwa soo socda:

Aaggaga Bukaan-jiifka ee Isbitaalka:

- Qaybta carruurta (laba waalid / mas'uuliin ayaa loo oggol yahay dhammaan aaggaga wakhtigiiba)
 - Qaybta dhalmada (hal qof - lamaane ama tababaraha – ayaa loo oggol yahay aagga foosha iyo dhalmada)
 - Daryeelka Degdega ah (laba booqdeyaal maalintiiba) - waqtiyada booqashada waxaa maareeyo kooxda daryeelka
 - Dhammaan aaggaga kale ee bukaan-jiifka (hal booqde maalintiiba) – waqtiyada booqashada waxaa maareeyo kooxda daryeelka
 - Dhimashada – dhammaan aaggaga (ilaa afar qof ayaa booqan kara bukaanada ay u badan tahay inay dhintaan 24 saacadood gudahood) (aaggaga oo dhan) – waqtiyada booqashada waxaa maareeyo kooxda daryeelka.
- Oggolaanshahan ma ahaan inuu sii jiro hal maalin kabadan

Bixinta Bukaanka: Bukaanka waxaa la geyn doonaa irrid habboon oo laga qaado.

Aaggaga Qalliinka Bukaan-socodka iyo Hab-raacyada: Hal qof ayaa loo oggol yahay aagga sugitaanka, haddii aagga sugitaanku ku filan yahay u hogaansanaanta hagida ku saabsan kala fogaanshaha dadka.

Waaxda Gurmadka: Hal qof ayaa loo oggol yahay inuu raaco bukaanka, haddii aagga sugitaanku ku filan yahay u hogaansanaanta hagida ku saabsan kala fogaanshaha dadka.

Aaggaga Gudbinta / Baarista: Bukaanada waxaa lagu dhiirigelinaya inay kaligood yimaadaan ama ay qabanqaabaystaan geynta iyo qaadida haddii aysan u baahanayn caawinaad gaar ah.

Bukaanka u Baahan Caawinaad Gaar ah: Haddii aanan lagu sheegin ka-reebitaanada hore, bukaan u baahan caawimaad, sida dhaqdhqaqaqa ama kala hadalka kooxda daryeelka wax ku saabsan daryeeliisa, ayaa waxaa caawin kara qof weyn oo wehliyo si uu u siiyo caawimaadka ama taageerada uu u baahan yahay, daruufaha noocan ah waxaa go'aaminayo bixiyeyaasha daryeelka.

Dhammaan booqdayaasha / wehliyayaasha waa la baaraya. Booqdayaasha / wehliyayaasha qaba astaamaha cudurka neef-mareenka LOOMA oggolaan doono inay galaan xarumaha isbitaalka MaineHealth. Booqdayaasha / wehliyayaasha waa inay 1) sameeyaan nadaafadda gacmaha ka hor intaysan soo galin iyo markay ka baxaan qolka bukaanka / aagga daryeelka; 2) xirtaan maaskaro

Somali

marwalba oo ay xarunta ku jiraan; iyo 3) ka fogaadaan inay aadaan goob kale oo xarunta dhexdeeda ah oo aan ahayn qolka bukaanka ay booqanayaan.

Xayiraadyadan waxaa loogu talagalay ilaalinta bukaanka, shaqaalaha, boooqdeyaasha, iyo dadweynaha, waxayna la jaan qaadayaan hagida ay bixiyeen mas'uuliyiinta dowladda, waxaana loo dhaqan gelinaya ujeedada ah yareynta suurtagalnimada faafinta fayruuska COVID-19. Xayiraadyadan waxaa lagu soo rogay amarka Madaxweynaha Isbitaalka iyo Sarkaalka ah Madaxa Caafimaadka.